# Helitaanka MFIP kadib 5ta sanno ee la xadiday: Waqti kordhin dhibaato darted

Getting MFIP After the 5-Year Limit: Hardship Extensions

## Ma sii wadi karaa helida MFIP ka dib kolka mudadda 5 sanno ahi ay dhamaato?

Dadka waaweyn intiisa badan waxa keliya oo ay heli karaan gargaarka lacageed ee MFIP 5 sano (60 bilood) noloshaada ah. **Haddii ay MFIP kaaga hartay wax ka yar hal sano, waa in aad hadda is diyaarisaa.** Waxaa laga yaabaa in aad hesho waqti kordhin dhibaato darteed. Taas micneheedu waxa weeye in aad ku sii jirto MFIP waqti dheeraad ah.

Haddii aad rabto waqti dheeraad ah, waa in aadan xayiraad ku jirin bisha 60aad ee kuugu dambaysay. La kulan la taliyaha shaqaalaynta si uu kaaga qaado waxii xayiraad ah. Wac Gargaare Shari yaqaan si kuu caawimo.

## Sidee u codsadaa waqti kordhin dhibaato darteed?

Ha sugin inta MFIP ay kaa dhamaanayso! Ugu yaraan 3 bilood ka hor weydii shaqaalah u qaabilsan MFIP ama la taliyaha shaqaalaynta in aad u baahantahay waqti kordhin dhibaato darteed in laguu sameeyo. Haddii ay diidaan, racfaan qaado isla markiiba. Wac gargaare shari yaqaan ee degmada jooga si uu kuu caawimo.

Waxa aad heli kartaa muddo dheerayn haddii mid ka mid ah waxyaabahan soo socda ee ku jira warqadan xogta aruursani ay jiraan.



### ♦ Aad shaqayso

Haddii aad shaqayso laakiin aadan laheyn dhakhli kugu filan oo kaa saari kara MFIP, codso waqti kordhin.

**Hal waalid** qoysasku way heli karaan waqti kordhin haddii waalidku:

- Uu shaqaynayo ugu yaraan **30** saacadood todobaadkiia ama
- Uu shaqaynayo **25** saac todobaadkii oo 5saac oo kale uu samaynaayo hawlgalo kale.

**Laba waalid** qoysasku waa heli karaan waqti kordhin haddii labada waalid:

- Ay shaqaynayaan ugu yaraan **55** saacadood todobaadkii ama
- Ay shaqaynayaan ugu yaraan 45 saacadood todobaadkii oo ay samaynayaan 10 saacadood oo hawgal kale.

“hawlgal/ dhaqdhaqaaq” waa waxyaabaha ay ka mid yihiin shaqa raadin, waxbarasho ama tababar, iskaa wax u qabso, ka shaqayn addeega bulshada, fasalada ESL. Waxay kaloo noqon karaan raadsasho tala bixin, ama baxnaanin si aad shaqo u qaban kartid, ama waxyaabo kale oo ku qoran qorshaha shaqaalaynta.

Haddii aadan shaqayn Karin saacadaha lagaa rabo oo dhan sababta oo ah waad jirran tahay ama waxaad tahay curyaan, wali way kuu banaanthay in aad waqti kordhin heshid haddii dhakhtarkaagu sidaas soo qoro. Si aad u isticmaasho waqti kordhinta, waa in aan xayiraad ku saarayn 10 bilood oo ka mid ah 12kii bilood ee ugu dambeeysay ee aad ku jirtay MFIP.

## ♦ Ma shaqaysid ama ma ku nagaan kartid shaqada aad hesho

Haddii aad qabto dhibaato aadan la shaqayn Karin, oo aadan aqoon sababta, weydii la taliyahaaga shaqaalaynta si uu kuu caawimo. Waxa ay kuu diri karaaan tijaabo sababta aadan shaqo u heli Karin ama shaqo u xejisan Karin. Haddii aad u maleynaso in aad leedahay awood la’aan waxbarasho, ama IQ hooseeya dalbo in lagu tijaabiyo. Haddii aad u malaynayso in aad maskax ahaan jirrantahay ama aad isku buuqsantahay si aad u shaqayso, waydiiso inaad aragto dhakhtarka cilmi safsiga (maskaxda).

Dalbo waqti kordhin isla markaana doono tijaabin. Waxaad heli kartaa waqti dheeraad ah ee MFIP haddii lagu tijaabiyo, oo khabiir xirfadle ah ama wakiil degmadu leedahay oogaado in aadan shaqayn Karin sababaha soo socda mid ka mid ah:

– Waxaad leedahay awood la’aan waxbarasho. Khabiir shaqo ayaa caddeeyay in awood la’aantaadu ay si aad iyo aad ah u xadidayso nooca shaqo ee aad qaban karto. Ama ay kaa dhigayso qof aan shaqayn Karin 20 saacadood iyo wax ka badan todobaadkii.

AMA

– Waxaad leedahay IQ ka hooseeya 80. Khabiir shaqo ayaa caddeeyay in IQ gaaga hooseeya uu si aad ah u xadidayo nooca shaqo oo aad qaban karto ama kaa dhigaya qof aa shaqayn karin 20 saacadood ama wax ka badan todobaadkii.

## ♦ Waad xanuunsantahay, maskax ahaan waad jirran tahay ama waxaad tahay curyaan

Weydii dhakhtarkaaga, ama dhaktarka cilmu safsiga in uu caddayn qoro. Haddii aad curyaan tahay waxaad dalban kartaa Caymiska Bulshada.



Caddayntaasi waxay sheegaysaa in aad jirrantahay, dhaawac tahay ama curyaan tahay oo :

- La filayo in aay qaadato wax ka badan 30 maamood iyo
- In ay kaa reebayso in aad shaqo heshid, ama aad shaqayn kartid 20 saacadood ama wax ka badan todobaadkii.

### ♦ Waxaad la nooshahay ama aad xanaanaysa qof qoyska ka mid ah oo xanuunsan, maskaxda ka jirran ama curyaan ah

Haddii qof qoyskaaga ka mid ah uu xanuunsanyahay, maskaxda ka jirran yahay, ama curyaan yahay, u geeya dhakhtar, dhakhaatiirta cilmu nafsiga. Haddii aadan shaqayn karin sababta oo ah waxaad xanaanaysa iyaga, waydii dhakhtarkooda in uu taas caddeeyo. Waxaad kaloo dhakhtarkooda weydiin karta in uu laguu ogolaado addeegga xanaanaynta guriga ama saacadaha daryeelaha shakhsiga ah (PCA).

Waxaad keentaa caddayn dhakhtarka oo sheegaysa:

- In aad guriga joogtid si aad iyaga u xanaanaysid iyo
- In xanuunkooda ama curyaannimadooda ay qaadanayso 30 maalmood ka badan.

### ♦ Waxaad la nooshahay ama aad xanaanaysaa qof qoyskaaga ka mi ah oo la siiyo adeeg guri ama ay haysato xaalad addag oo shucuuretiisu kacsantahay ama qaba jirro maskaxda ah

Caddayn ka soo qor dhakhtarkooda ama meesha bixisa adeegga guriga oo sheegaysa in qofka qoyskaaga ahi:

- La siiyo adeegga xanaanaynta guriga,
- La siiyo adeeg guriga ama mid bulsho oo xiyiraad laga qaaday ,
- Waxaa haysta shucuurtiisa oo si aad ah u kacsan ama
- Waxaa si adag oo joogta ah u haysta jirro maskaxda ah.

### ♦ Waxaad tahay dhibane rabshado qoys

Waxaad u baahantahay in qorshahaaga shaqaalaynta laga qaado xayiraadda rabshadaha qoyska. Arrintaas waxaa wada gaaraya adiga, u doodaha rabshadaha qoyska iyo la taliyaha shaqaalaynta. Fiiri xogta urursan *Banaamijka MFIP iyo FSS ee dhibanaha rabshadaha qoyska*.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**